

Bayaan Kuwajahan Ummada Soomaaliyeed meelay joogaanba

- 1- Ugu horayntii wuxuu Golaha Imaamyada Waqooyiga Ameerica u dardaar mayaa ummada Somaaliyeed Alle ka cabsi meel kasta oo ay joogaan, waxaan ugu baaqaynaa gaar ahaan ummada Soomaaliyeed ee ku nool Maraykanka inay Diintooda ku dhaqmaan, ogaadana inay xaq u leeyihiin inay muujistaan dhaqankooda iyo Diintooda.
- 2- Wuxuu Goluhu ummada Soomaaliyeed ee ku nool Waqooyiga Ameerika ugu baaqayaa inay u duceeyaan, garab istaagaanna dadaalada loogu jiro soodaynta Imaamkii Masjidka Al- Ansar Sh. Maxamed Khadar, Sh. Ciise Dhoore iyo walaalaha kale ee ku xiran Magaalada San Diego, CA.
- 3- Waxuu Goluhu ugu baaqayaa Ummada Soomaaliyeed inay muhiimad siiyaan Barashada cilmiga sharciga ah, kan maadiga ah, laguna xirnaado culimmada iyo Maraakista ummadu ku baratay Cilmiga, Alle kacabsiga iyo faafinta diinta.
- 4- Waxuu Goluhu ummada Soomaaliyeed ugu baaqayaa inay ku dadaalaan Midnimada dhexdooda ah, kana fogaadaan waxkasta oo u keeni kara kala tag iyo tafaraaruq. Sidoo kale wuxuu Goluhu ugu baaqayaa ummada Soomaaliyeed ee ku nool Qurbaha gaar ahaan Waqooyiga Ameerika inay tusaale wanaagsan u noqdaan bulshada ay wada noolyihiin , sida ay farayso Diinteena Islaamka, meelna uga soo wada jeestaan dadka ummada Soomaaliyeed sumcadooda iyo sawirkooda xumaynaya.

- 5- Wuxuu Goluhu ugu baaqayaa qoysaska Soomaaliyeed inay dhibaata dooda iyo khilaafkooda yareeyaan, kuna xalistaan wixii khilaaf ah ee ku yimaada inay ula noqdaan culimmada iyo Marakista Islaamiga ah. Sidoo kale In qoysaska Muslimka ah ku daddaalaan inay ahmiyad gaara siiyaan in Jiilka soo koraya lagu tarbiyeeyo akhlaaqda wanaagsan ee Diinta Islaamka na farayso.
- 6- Wuxuu Goluhu ugu baaqayaa dhalinyarada Soomaaliyeed gaar ahaan kuwa qurbaha jooga, inay waqtigooda uga faa'iidiyaadaan barashada Diinta Islaamka iyo aqoonta kale ee Maadiga ah, si mustaqbalkooda aduun iyo aakhiroba u hagaago, sidoo kalena inay dareemaan inay haystaan fursad aysan haysan dhalin yaro badan oo Soomaaliyeed.
- 7- Wuxuu Goluhu ugu baaqayaa ummada Soomaaliyeed ee awooda gaar ahaan kuwa Waqooyiga Ameerica inay gargaar iyo gurmada u fidiyaan walaalahooda Abaaraha daran ku habsadeen wadanka Soomaaliya.
- 8- Wuxuu Goluhu ugu baaqayaa ummada Soomaaliyeed ee wadanka ku sugan In ay illaahay u noqdaan, dhibka u dhaxeeyana ku xaliyaan shareecada Islaamka, kana Marjic dhigtaan Culimada Soomaaliyeed.
- 9- Waxaa Goluhu usoo jeedinayaa Dhamaan Culimada iyo waxgaradka Soomaaliyeed dal iyo dibadba inay xal u raadiyaan dhibaatooyinka ummada ku haysta dibad iyo gudaba oo hada labaatan jirsaday.

Ugu danbaytii waxaan illaahay uga baryeynaa Ummadda Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaanba inuu illaahay ka dulqaado dhibaatooyinka faraha badan ee ku haysta dal iyo dibadba.

Waxaa ku saxiixan

Sh. Cabdiraxman Sh. Cumar

Gudoomiyaha Golaha Imaamyada ee Waqooyiga Ameerika